



## adeerow, dheh: laa Ilaaha Ilaa Allaah, kalimadaas Ilaahay agtiisa inaan kaaga markhaati noqdo aan xujo ka dhigtee

Saciid Binu Musayib wuxuu yiri isagoo Aabihii ka warinaya: Markii Abuu Daalib dhimanayey ayaa Rasuulku scw u yimid wuxuu ugu yimid Abuu Jahal iyo Cabdullaahi Binu Abii Umayya Binu Almuqiira oo la jooga, wuxuu ku yiri: "adeerow, dheh: laa Ilaaha Ilaa Allaah, kalimadaas Ilaahay agtiisa inaan kaaga markhaati noqdo aan xujo ka dhigtee", Abuu Jahal iyo Cabdullaahi Binu Abii Umayya ayaa yiri: ma diintii Aabahaa Cabdul-muddalib baad nici oo aad ka leexan, Nabigu scw kama daaline wuu ku cel-celiyey, iyaguna tooday ku cel-celineyeen, ilaa uu yiri Abuu Daalib hadalkii ugu dambeeyey oo ahaa: diintii Cabdul-muddalib baan ku adkaystay, wuuna diiday inuu dhoho: laa Ilaaha Ilaa Allaah, wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-: "Ilaahay ayaan ku dhaartaye waan kuu dambi dhaaf waydiin hadii aan la ii kaa diidin, Ilaahay baa soo dajiyey: "Nabiga iyo muminiinta maaha inay Gaalada u dambi dhaaf dalbaan)) [ tawbah:113], Ilaahay xaalka Abii Daalib wuxuu ku soo dajiyey, wuxuu ku yiri Rasuulkiisa-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-:"Xaqa kuma hanoonin kartid qofkaad jeceshahay , laakiin Ilaahay ayaa ciduu doono xaqa ku hanooniya" [Alqasas: 56].

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabiga naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- ayaa u soo galay adeerkii Abii Daalib isagoo sakaraadkii ku jira, wuxuuna ku yiri: adeerow, dheh: ..laa Ilaaha Ilaa Allaah.., kalimadaas aan Ilaahay agtiisa kaaga markhaati furee, Abuu Jahal iyo Cabdullaahi Binu Abii Umayya oo la joogay baa yiri: Abuu Daalibow ma diintii Aabahaa Cabdul-mudalib baad ka bixi?! taasoo ahayd sanam la caabudo, kama ay dultagin siday ugu cel-celineyeen ilaa uu yiri hadalkii ugu dambeeyey ee uu kula hadlo iyaga, isagoo yiri: diintii Cabdul-mudalib ayaan haystaa, waa diintii shirkiga iyo sanam caabudka ahayd. Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu yiri: waxaan kuugu ducayn dambi dhaaf hadaanu Rabigay iga diidin arinkaa, waxaa soo dagay hadalkii Ilaahay yiri: "Maaha Nabiga iyo muminiintu inay u dambi dhaaf waydiyaan mushrikiinta, haba ahaadaan kuwo qaraabo ahee, ka dib markay u cadaatay inay yihiin dad ahlu naar ah} [tawbah:113], Waxaan ku soo dagay Abii Daalib xaalkiisa hadalka Ilaahay yiri: "Nabiyow- adigu xaqa kuma hanuunin kartid qofkaad jeceshahay, laakiin Ilaahay ayaa hanuunka haya oo hanuunka siiya mid kuu doono, Isagaana og kuwa hanuunsan} [Alqasas: 56], Adigu ma hanuunin kartid qofkaad hanuunka la doonto, waxaase ku saaran gaarsiin, Ilaahay ayaana hanuuniya ciduu doono.

النجاة الخيرية  
ALNAJAT CHARITY

